

SWEP – RA’YI-CELINTA

Sida loo bixiyo ra’yi-celinta?

Ra’yi-celinta waxaa loo bixin karaa siyaabaha soo socda:

- Buuxi foomka ra’yi-celinta (oo laga heli karo ayadoo laga soo degsado website-ka <http://swep.bhs.org.au/> ama ayadoo nalala soo xiriiro oo aan kuu soo dirno).
- Wac khadka Adeegeena Macaamiilka oo ah: **1300 PH SWEP (1300 747 937) ama (03) 5333 8100**. Haddii aad u baahan tahay turjumaan, ama aad qabto iin maqal ama hadal, waxaad wici kartaa ama **131 450** wixii adeegga turjumidda ah. Waxaan kaloo kugu caawin karnaa inaad hesho adeegga Turjumaanka Victorian Interpreting & Translating Service ama Adeega National Relay Service.
- Noogu soo qor: **P.O. Box 1993, Bakery Hill, Vic 3354**
- Email noogu soo dir **swep@bhs.org.au**
- Fax noogu soo dir **03 5333 8111**

Haddii aan sameeyo cabasho ma laygu dulmin doonaa wada-xaajoodka mustaqbalka ee SWEP?

SWEP waxay soo dhaweynaysaa ra’yi-celinta ku saabsan adeegyada ay bixiso, oo ay ka mid yihiin mahad-naqa, tusaalaynta iyo cabashooyinka. Ra’yi-celinta wax dhisaysa waxay noo sheegaysaa waxaad ka qadarinaysa SWEP iyo shaqooyinka aan qabano, sidoo kale waxay nagu caawinaysaa inaan ogaano meelaha wax hagaajinta u baahan. Haddii aad samayso cabasho si fiican ayaa wax looga qaban doonaa adiguna kuma dulmanaan doontid la macaamiliddaada SWEP.

Cabashadayda ma laga soo jawaabayaa?

Haddii aad qabto wax cabasho ah, waa laga soo jawaabayaa sida ugu dhaqsaha badan. Si lagaaga caawiyo inaad si degdeg ah u soo jawaabto oo waxtar ah, waxaan kaa codsanaynaa inaad:

- Noo sheegto haddii aad caawimaad uga baahan tahay soo gudbinta ra’yi-celintaada ama cabashadaada, oo ay ka mid yihiin turjumaan ama cid kale oo u idman inay wax na weydiiso ayadoo kaa wakiil ah.
- Na sii sida ugu badan faahfaahinta gaarka ah oo ku saabsan xaaladdaada intii aad karto.
- Ula dhaqan shaqaalaha si xushmad iyo ixtiraam ku jiro.

Waxaan ballan-qaadaynaa inaan si daran u qaadano dhammaan wixii ra’yi-celin ah iyo inaan si degdeg ah u xallino wixii jira oo dhan.

Maxaa dhacaya haddii aanan ku qanacsanayn natiijada cabashada?

Markii aanan awoodin inaan xallino cabashada xagga qanacsanaantaada, waxaan kuu sharxi doonaa sababta waxaana kuu sheegaynaa ikhtihaarada kale oo aad heli karto.